

## Alberta oo qaadeysa xannibaadaha caafimaadka ee haray

Juun 13, 2022

---

Alberta waxay qaadi doontaa tillaabadii ugu dambaysay ee qorshaheeda si loo fududeeyo tillaabooyinka caafimaadka bulshada maadaama gobolku ka gudbayo hirarka Omikron (Omicron) BA.2 iyo ibitaal dhigista la xiriirta KOOFID-19 (COVID-19) ay sii yaraanayaan.

Heerka cusub ee isbitaal dhigista ayaa hoos u sii dhacayey ilaa heerkii ugu sarreeyey ee Abriil 26, markaasoo ay jireen 20.7 KOOFID-19 (COVID-19) cusub oo la seexiyey maalintiiba milyankii qof. Laga bilaabo Juun 9, celceliska toddobaadlaha ee heerka cusub ee isbitaal dhigista wuxuu ahaa 6.6 maalintii milyankii qofba.

Tijaabada PCR ee togan iyo ilaalinta biyaha wasakhda ah waxay sidoo kale muujinaysaa isbeddel sii socda ee hoos u dhaca gudbinta KOOFID-19 (COVID-19).

Laga bilaabo Juun 14keeda saacadu markay tahay 11:59 p.m., Alberta waxay u guuri doontaa Talaabada 3, oo ay ku jirto qaadista af ku xirashada gaadiidka dadweynaha iyo soo afjarida go'doominta qasabka ah, ee la socota British Columbia, Saskatchewan iyo Manitoba. Go'doon iney galaan ayaa lagu talin doonaa kuwa leh calaamadaha ama baaritaanka KOOFID-19 (COVID-19) ee togan.

Shaqada ayaa socota si loogu diyaar garoobo xilliga dayrta iyo xilliga jiilaalka ee fayraska neefsashada. Tan waxaa ka mid ah ilaalinta barnaamijyada la socodka iyo tijaabinta iyo u diyaarinta ballaarinta awoodda qalliinka daryeelka degdega ah.

### **Tillaabada 3 - Tallaabooyinka waxay sii jirayaan illaa Juun 14 saacadda 11:59 galabnimo Laga bilaabo 12 subaxnimo Juun 15:**

- Go'doon galida khasabka ah waxay noqo doontaa talobixin keliya.
- Afxirka qasabka ah ee gaadiidka dadweynaha waa la qaaday.

Afxirka iyo tallaabooyin kasta oo kale oo lagu ilaalinayo bukaannada ku jira Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) iyo xarumaha caafimaadka ee qandaraaska waxay ku sii jiri doonaan nidaamka AHS sida looga baahan yahay ka hortagga iyo xakamaynta caabuqa.

Awaamiirta CMOH ee sii wadida daryeelka waa la burin doonaa Juun 30 laakiin qaar ka mid ah tallaabooyinka goobaha sii wadida daryeelka ayaa ku sii jiri doona heerarka iyo xeerarka. Tan waxaa ka mid

ah ilaalinta dhaqamada sida go'doominta deganayaasha calaamadaha leh, borotokoolka dillaaca cudurada iyo afxirka.

## Tallaalada KOOFID-19 (COVID-19)

Tallaalada waxay aasaas u yihiin awoodda Alberta ee la noolaanshaha KOOFID-19 (COVID-19). Dadka reer Alberta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaataan dhammaan qiyaasaha ay xaqa u leeyihiin.

Tallaalada si diyaar ah ayaa looga heli karaa gobolka oo dhan iyadoo lagu saleynayo ballan qabsasho. Ballamaha waxa kale oo laga heli karaa Nidaamka Ballan Qabsashada Tallaalka Alberta the [Alberta Vaccine Booking System](#) ama adoo wacaya 811 ama farmashiyaha ka qaybqaadanaya.

## Baarista degdeg ah

Alberta waxay sii wadaa inay bixiso baarista degdega ee lacag la'aan ah. Si aad u hesho meel, booqo [alberta.ca/CovidRapidTests](https://alberta.ca/CovidRapidTests). Kaarka Daryeelka Caafimaadka Alberta looma baahna si uu u soo qaato xirmo baaris oo degdeg ah.

## Weydiimaha warbaahinta

**Steve Buick**

780-288-1735

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Wasaaradda Caafimaadka

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in white, bold, uppercase letters. The text is enclosed in a white rectangular border that is partially open at the top right corner, where a yellow L-shaped graphic element is attached. The entire logo is set against a dark blue background.

**ALBERTA'S  
RECOVERY  
PLAN**

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.